



Ujeedada Barnaamijka: ▼

Baridda bulshada sida looga hortago dambiga naceybka

In la siiyo bulshooyinka macluumaadka iyo sida ugu wanaagsan ee loo sugo amniga meelaha macbadka iyo loogu jawaabo xaaladaha ay jirto kuwa dadka toogto

Kor loo qaado xiriirka u dhaxeeya hay'adaha dowladda iyo hormuud diineedka bulshada

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada

Difaaca Meelaha Macbadka

Si Wadahadal iyo Waxbarasho ah

Barnaamijka fududeynta ee Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada (CRS) ee Difaaca Meelaha Macbadka waxuu baraa bulshada deegaanka sida looga hortago loogana jawaabo dambiyada naceybka ee abaaro hay'adaha diiniga iyo si loo xoojiyo wadahadalka iyo xiriirka u dhaxeeya dowladda, nabad sugidda, iyo bulshooyinka diinta ku dhaqmo

Barnaamijkan sedexda-saacadood soconoya waa mid looga jawaabayo falal rabsho ee isku xigxiga ee looga soo horjeedo meelaha macbadka ee bulshooyinka Markeyanka ku baahsan, waxaana loogu tala galay inuu kordhiyo amniga xarumaha diiniga ee deegaanka. Codsasho kadib, CRS waxay isku keentaa qubaro dulmar guud ka bixiya sharciyada dambiga naceybka, istaatiitikada iyo kiisaska horay u dhacay, iyo amniga. Barnaamijka waxaa kale uu fududeeyaa wadahadalka iyo kobcinta iskaashiga u dhaxeeya nabad sugidda iyo hay'adaha diiniga.

Dulmarka Guud ee Barnaamijka ▼



Golaha Maxkamadeynta Dambiyada Naceybka

Wakiillo ka socda Xafiiska Garyaqaanka Markeykanka (U.S. Attorney) iyo xafiiska degmada iyo gobolka ee maxkamadeynta ayaa ka hadla sharciyada federaalka iyo gobolka ee dambiga naceybka si loo kordhiyo wacyigelinta siyaabaha looga soo warbixyo iyo loo maxkamadeeyo.

Istaatiitikada iyo Kiisaska Horay u Dhacay ee Dambiyada Naceybka

Wakiilada xoojinta sharciga federaalka ama ururada loo aqoonsan yahay xuquuqda aadnaha ayaa keenay xogo iyo waxyaabo ah xagga denbiyada nacaybka oo bixiyay tusaalooyin denbiyada nacaybka ka dhacay meelaha wax lagu caabudo.

Sida loogu jawaabo Kuwa Dadka toogto iyo Loo Sugo Aminga Meelaha Macbadka

Qubarada ka socoto federaalka, gobolka, ama nabad sugidda deegaanka waxay dulmar guud ka bixiyaan sida loogu jawaabo kuwa dadka toogto iyo siyaabaha ugu fiican ee loo qiimeeyo sugidda aminga meelaha macbadka.

Golaha Hormuudka Bulshada Diiniga

Gole hormuudka bulshada diiniga ayaa soo jeediyo qaababka lagu kobciyo wada xiriirka iyo is aaminka u dhaxeeya nabad sugidda, qubarada nabada, iyo bulshada diiniga.

Waa Ayo CRS ▼

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” u ah bulshada soo wajahday xiisado ama isku-dhac ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. Ujeedka adeegyada CRS waa inay kor uqaado awooda bulshada ay si gooni ah iyo wadajir ah uga hortagaan una xaliyaan iskudhac mustaqbalka ayadoo la isticmaalayo sida xalinta dhibaataada, aqoon kordhin, iyo ka shaqeynta xiriirka.

Adeeyada iyo Barnaamijyada CRS ▼

CRS waxay siisaa bulshooyinka la kulmo xiisad, barnaamijyo gogoldhig u ah fahanka, hagaajinta wadashaqeynta, iyo kahortagga iska hor imaad mustaqbalka. Shaqaalaha CRS waa xirfadlayaal dhexdhexaadiyaal, tababarayaal, iyo la taliyayaal khibrad u leh isku keenka xubnaha bulshada si ay u hagaajiyaan awoodooda xalinta iskudhac jiro iyo ka hortagaan iskudhac mustaqbalka ah.

Xagee ka Shaqeynaa ▼

Xarunta CRS 📍
Washington, DC

Xafiisyada Gobolada CRS 📍

New England
Boston, MA

Galbeedka-dhexe
Chicago, IL

Galbeedka
Los Angeles, CA

Waqooyi-bari
New York, NY

Konfur-galbeed
Dallas, TX

Waqooyi-galbeed
Seattle, WA

Atlantiga-Dhexe
Philadelphia, PA


Dhexda
Kansas City, MO

Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada 📍

Konfur-bari
Atlanta, GA

Buuraleyda
Denver, CO

Miami, FL Houston, TX
Detroit, MI San Francisco, CA



Naga hel, nagala soo xiriir ▼

www.justice.gov/crs

 [facebook.com/DOJCRS/](https://www.facebook.com/DOJCRS/)

 [@DOJ_CRIS](https://twitter.com/DOJ_CRIS)

 askcrs@usdoj.gov

 202.305.2935

Wixii macluumaad barnaamijkan ee dheeri ah ama adeegyada kale ee CRS, fadlan la xiriir xafiiska CRS ee magaaladaada.
<https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices>